



# Ka-Dhaafka iyo Siidaynta Waalidka/Mas'uulka ee loogu talagalay Dhacdooyinka Barnaamijka Waxbarashada

Si ay uga qaybqaataan dhacdadan Barnaamijka Waxbarashada ("Dhacdada") ee Mountains to Sound Greenway, da'-yare kasta (ka yar 18) ayaa ah inay keenaan dhacdada nuqul la buuxiyay oo ah Ka-Dhaafkan iyo Siidayntan, oo ay saxiixeen waalidkood ama mas'uulkooda sharciyeed isaga ama iyada. **Da'-yaraha aan wadan Ka-Dhaafka iyo Siidaynta oo saxiixan looma oggolaan doono inay ka qaybqaataan Dhacdadan.**

Markaan saxiixo Ka-Dhaafkan iyo Siidayntan, anigu waxaan oggolahay shuruudahan soo socda:

- Kaalinta:** Anigu waxaan ahay waalid ama mas'uul sharci ee ilmaha da'-yare ah ee hoosta ku magacaaban. Anigu waxaan ahay da'da sharci ahaan ku qumman inaan saxiixo Ka-Dhaafkan iyo Siidayntan.
- Qaadista masuuliyadda Halista:** Waxaan ogahay in waxqabad kasta oo meelaha dibadda ah ay jiri karaan khataro, ay ka midkana yihiin laakiin aan ku xaddidnayn halista dhaawac daran ama dhimasho, khataraha shilalka, u-feydanka khataraha bey'adda, qaniinyo xayawaan/cayayaan, taabasho dhirta sunta ah, iyo falalka ka qaybqaatayaasha iyo dadka kaleba. Halisahan aniga oo aqoon buuxda u leh, ayaan anigu caddaynayaa inuu ilmahagu haysto u oggolaantayda inuu ka qaybqaato Dhacdadan.
- U Oggolaanta Daryeelka Caafimaadka:** Ilmahayga caafimaadkiisu wuu wanaagsan yahay, marka laga reebo sidaan ugu wargaliyay **goraal ahaan** macallinka ama kormeerayaasha qaangaarka ah ee Dhacdada. Waxaan halkan ugu oggolaanayaa dawaynta caafimaad ee xaaladaha degdegga ah ilmahayga. Waxaan aqbalayaa mas'uuliyadda lacageed ee buuxda ee dhammaan kharashyada caafimaadka ee lagu galo awgeed ka qaybqaadashada ilmahayga ee Dhacdadan.
- Siidaynta iyo Magdhabidda:** Aniga ayaa halkan **kaga siidaynayaa waxa kasta oo u-sheegasho ah, oo oggol in aan waxba u sheegan oo aan ka magdhabo** Mountains to Sound Greenway Trust, shaqaalaheeda, saraakiisheeda, wakiilladeeda, dhaxlayaasheeda, iyo kuwa wax loo dirsado, ama tabarucayaasha kale wax kasta oo ah u sheegasho oo ay yeeshaan aniga ama ilmahayga ama kuwa wakiilka naga ah, oo ay ku jiraan sheegashooyinka waalidka kale, qaraabo, ama mas'uulka sharciga ah, oo ay ku jiraan sheegashada hadda iyo mustaqbalka ee ilmahayga, oo ay ku jiraan dhaawac, khasaare, ama waxyeello sabab ah dayacidda, falalka aan ula kac ahayn, iyo ka gaabin wax ka qabasho dhinac kasta ha noqotee, iyo khasaaro kasta ama kharashka, taas oo ka qaybgalka ilmaheeyga ee dhacdadan ka soo bixi karta. Ka-Dhaafkan iyo Siidayntan waxa loogu talagalay inuu na qabto aniga, qoyskayga (oo uu ku jiro ilmahaygu), dhaxlayaashayda, hantidayda, wakiilladayda sharciyeed, iyo kuwaan dirsado. Wixii kasta ee ficil sharci ah ee laga yaabo inay ka soo baxaan ka qaybqaadashada dhacdadan ee ilmahayga ayaa la hor keeni doonaa Maxkamadda Sare ee King County ee Gobolka Washington oo lagu xukumi doono sharciga Washington.
- Isticmaalka sawirka iyo shaqada ardayga:** Haddii ay dhacdo in ilmahayga la sawiro ama fiidiyo laga qabto markay ka qeybqaadanayaan dhacdo Mountains to Sound Greenway Trust ama uu curiyo qoraallo ama shaqo farshaxan, anigu waxaan oggolahay in sawirka, ka qabashada fiidiyaha, ama shaqada ardayga loo isticmaali karo arrimo xayaysiis ama waxbarasho oo gaar u ah Mountains to Sound Greenway Trust ama mid ka mid ah shuraakaheeda ama hay'adaha kafaala-qaadanaya dhacdada bilaa ka bixin lacag ama magdhow.
- Xilalka Waalidiinta/Mas'uuliyiinta:** Waxaan qaadi doonaa xilka inaan ku dadaalo inuu ilmahaygu sida habboon ugu diyaargarooobo dhammaan waxqabadyada Dhacdadan oo ay ku jirto dharka iyo qalabka ku habboon iyo inay caafimaad-qab ahaadaan. Waxaan ugu wargaliyay dadka waawayn ah ee kormeeraya **goraal ahaan** wixii kasta ee gaar ahaan jir, dhimir, bulsho, ama xaalad kale ahaanba kormeeraha ilmahaygu ay tahay inuu ogaado.

**Saxiixa Waalidka/Mas'uulka:** \_\_\_\_\_ **Taariikhda:** \_\_\_\_\_

<b>Magaca Arday</b>			
<b>Dugsiga</b>		<b>Macallinka</b>	
<b>Magaca Waalid/Mas'uul</b>			
<b>Cinwaanka</b>		<b>Telefoonka</b>	
<b>Qofka xaaladaha deg deg ah loola soo Xidhiidheyo haddii aan ku heli kari wayno</b>	Magaca	Waxa Isku-Ahaanta	Telefoonka